# CENTER FOR INCLUSIVE CHILD CARE

## Talo Kooban

Sida ay Ciyaartu Uhormariso Dhismaha Maskaxda

Ciyaartu waxay siyaadisaa dhismaha iyo xirfado maskax oo kaladuwan. Markii ay caruurtu ciyaar kaqayb qaataan fursad buuxdana u helaan in ay sidey rabaan ugu mashquulaan waxa ay markaa samaynayaan, waxaa kusiyaada habab fikir sare oo qaabaysan. Caruurtu waxay baranayaan xallinta masalooyinka marka ay ogadaan jawaabaha su'aalahooda sida, "Muxuu kan sameeyaa?," "Shaygaan meeshaan magalaa?," ama "Maxaa dhacaya hadaan saan sameeyo?," Marka ay caruurtu u helaan fursad muddo dheer ah (ugu yaraan 30 daqiiqo oo aan kala go' lahayn) oo ay kuciyaaraan ciyaar macna leh oo macquul ah oo kunahaboon noloshooda waxaa ukordha xasuusta iyo fahanka.

### Musikada Ciyaaraha iyo Dhismaha Maskaxda

Dhismaha maskaxda wuxuu kukobcaa markuu cunugu helo goobo kaladuwan oo uu wax kabarto, casharo iyo alaab loo diyaariyey cunuga. Marka ay caruurtu kuciyaarayso goobta musikada, oo ay heesaan, oo ay faraha kaciyaaraan, qalabka musikada nah ay tijaabiyaan waxay bartaan nakhshadaha, garaaca qalabka musikada iyo in ay jiraan codad badan oo kaladuwan. Waxay bartaan aqoonta iskahorimaadka sida deg deg/gaabis iyo dhawaaq/ cod gaaban. Xirfadaha maqalkuna waa hagaagaan ayagoo isla markaa wax ka baranaya sabab iyo saamayn. “Markaan durbaanka xoog wax ugu dhufto dhawaaq xoog leh ayaa kayeera.”

### Ciyaarta Farshaxanka iyo Dhismaha Maskaxda

Inta caruurtu ay goobta farshaxanka kaqayb qaadanayaan ciyaar ay ayagu iskood u wataan waxay baranayaan midabyada, qaababka, iyo waxyabaha la taabto tilmaantooda. Alaabta farshaxanka waxay siinaysaa caruurta fursad ay wax nooc ukaladhigaan ayna kala soocaan (aqoon hadhoow muhiim ku ah barashada xisaabta). Caruurtu markii ay rinjiga isu dardarayaan waxbay qiyaasi karaan si ay usoosaaraan midabyo cusub. Waxaa abuurmaya xirfado laxiriira fikirka iyo sida wax loogu fiirsado markii ay caruurtu ay ufiirsadaan geed kadibna ay geed sawiraan.

Khibradaha noocaan ah waxay caruurta ku dhiiragalinayaan in ay kafakaraan su'aalo sida, "Maxay yihiin qaybaha geedku uu ka koobanyahay?," "Geedka laamihiisa makor beey ujeedaan mese hoos?" iyo "Muxuu geedkaan uleeyahay caleemo kaa kale nah uu uleeyahay mudacyo?" Markii ay caruurtu ku hawlanyihiin geedi socodka farshaxanka, Intii ay isagamashquuli lahaayeen wax qof sameeyey, waxay awood uyeelanayaan in ay hal-abuur sameeyaan, ayagoo alaabta meesha taal iskood intay isticmaalaan muujiya fikradooda iyo dareenadoooda. Tani waxay kadhisaysaa caruurta kartidooda iyo kalsoonidooda.

### Ciyaarta Jilida iyo Dhismaha Maskaxda

Ciyaaraha wax lagu jilo waxay caruurta siisaa tababar kusaabsan wax qorsheeynta, wax isu duwidda iyo sida loo sheekeeyo. Marka ugu horeeysa mawduuc beey mala awaalaan marka ay ciyaarayaan. Waxaa xigta in ay xoogga saaraan oo ay hawsha ay hayyan digtooni siiyaan si ay diiradda usaaraan in ay fikradahooda isukeenaan, qalab aruursadaan, xalna uraadiyaan waxa markaa ay qabanayaan. Caruurtu waxay baranayaan in ay fikradahooda dadka lawadaagaan iyo in ay shay u

isticmaalaan in ay u matalaan shay kale, iyo ayagu ruuxooda in ay dadkale iska dhigaan oo ay qof kale matalaan. Aqoontaan waxay aayatiinka caruurta fahamsiinaysaa in xarfuhu ay matalaan dhawaaq iyo in tiradu ay matasho mugga. Ciyaarta jilidda waxay caruurta u suura galinaysaa in ay fikradahooda muujiyaan iyo in ay bartaan in lakala fikrad duwanyahay oo sida aduunku uu wax u arkayo in ay kaduwantahay sida ayagu ay wax u arkaan.

## Ciyaarta wax Dhisidda iyo Dhismaha Maskaxda

Markii caruurtu ay wax dhisto waxay baranayaan mabaadi'da miisaaniyadda, culeyska, iyo sababaha iyo saamaynta. Waxay baranayaan cabbirka iyo qaabka alaabta isgali karta ama la isisaari karo, iyo in wixii koor loo qaado ay hoos imaan karaan iyo markii wixii ay dhiseen u dhulka kudaato in masana waxladhiso. Ciyaarta dhisidda waxay ku dhiiragalinaysaa caruurta inay la yimaadaan fikrado ku saabsan dhismayaasha ay qorsheynayan inay dhisaan, in u qalab aruursadaan, qalabka is duwaan masaalooyinka kuyimaadana ay xalistaan inta ay dhismaha wadaan oo fikirkoodi si dhab ah u hirgaliyaan. Inta ay caruurta kujiraan wax dhisoow, waxay fahmayaan aqoon laxirrirta xisaabta sida tirada, sida wax lookala hormariyo, qiyaasta booska, dhererka, qaabka iyo misaanka. Waxay tababar ku qaadanayaan wax tijaabinta, wax ufiirsashada, isbarbardhigga, iyo inay kushaqaystaan qaabab kala duwan, qiyaas, iyo tirsi. Xirfadaahaan oo dhan waxay aas aas u yihiin fahanka xisaabta, sayniska iyo inuu fikirka qotada dheer ee maskaxda uu udhismo.

## Ciyaarta Farsamada Gacanta iyo Dhisidda Maskaxda

Qalabka yar yar oo isgala sida Legos'ka, baloogyada ganfaxyada leh, kuwa magnatka leh, iyo kuwa isgala waxaa loo wada yaqaan alaabta ciyaarta farsamada gacanta. Ciyaarta farsamada gacanta waxay caruurta kudhiiragalisaa xirfado udiyaarinaya caruurta maadada xisaabta kaas oo kacaawinaya caruurtu in ay kagudubto waxa waaqiciga ah oo lataaban karo oo ugudbaan in ay kafakaraan waxyaabaha aan lataaban karin. Xirfadahaan waxaa kamid ah:

- Wax kala soocidda: waxay muhiim u tahay fahanka nakhshadaha iyo fansaarka.
- Habaynta: waxay kobcisaa fahanka tirade
- Ratibaad kalasaarid: aas aas u ah xisaabta guud.
- Aqoonsiga qaababka joometeriga iyo cilaaqaadkooda.
- In laasaadaalin karo qiyaasta
- Fahanka iyo sharaxaadda muqaallada

## Ciyaarta Dareenka iyo Dhisidda Maskaxda

Caruurta inta badan waxay xiiseeyaan ciyaarta dareemaha laxiriira sida in lagu ciyaaro ciidda, biyaha, wixii kale oo ladareemi karo. Ciyaarta dareenka waxay siisaa caruurta fursad ay kutijaabiyaan aqoon sayniska laxiriira sida quusidda, sabbaynta, iyo sida ay wax isu bedelaan (biyuhu waxay isu bedeli karaan baraf kadibna biyo masana). Markii ciyaarta dareenka caruurta loogu daro weelasha wax lagu cabiro waxay ku tababaran karaan cabbirka waxayna bartaan aqoonta ah badnaasho, yaraan, kaweeyn, kayar, lamid ah iyo mugga. Ciyaarta dareenka waxay caruurta kadhistaa in ay wax mala awaalaan kadibna ay bartaan wax ay kudhismayso cilmiga sayniska.

Wixii macluumaad dheeraad ah, booqo www.inclusivechildcare.org.

*Copyright © 2020 Center for Inclusive Child Care*

*Qalabkan waxaa si tartiib tartiib ah loogu soo saari karaa ujeeddooyin waxbarasho. Macluumaadka ku yaal xaashidan tilmaamaha ah waxaa laga beddelay ilo badan.*

*Dhaqaale ay bixiso Waaxda Adeegyada Aadanaha ee Minnesota.*